

Oggolaanshaha Xaqiijinta Elektarooniga ah

Shuruudaha iyo Xeerarka Good To Go!

SHURUUDAHA IYO XEERARKA DHEERAADKA AH EE KHADKA ADEEGYADA BAANKA EE ELEKTARONIGA AH (AUTOMATED CLEARING HOUSE, ACH), OO AY LA SOCDAAN SHURUUDAHA IYO XEERARKA AASAASIGA AH IYO CODSIGAAGA, WAXAY QAYB KA YIHIIN WAAXDA GAADIIDKA EE GOBALKA WASHINGTON (WASHINGTON STATE DEPARTMENT OF TRANSPORTATION, WSDOT) *GOOD TO GO!* HESHIISKA MACMIILKA ("HESHIISKA") EE LA GAARAY IYO AY GALEEN UNA DHAXEYYA "MACMIILKA" IYO XARUNTA ADEEGGA MACMIILKA WSDOT *GOOD TO GO!* ("XARUNTA ADEEGGA MACMIILKA").

Marka aad gujiso "waan aqbalay", waxaad qiraysaa inaad akhriday aadna oggolaatay *Good To Go!* kaaga aasaasiga ah. Xeerarka iyo shuruudaha iyo Xaqiijinta Elektarooniga ah (ACH) Shuruudaha iyo Xeerarka waxaa lagu liis gareeyay hoos. Waxaad fahamsan tahay in cadadka xadka ah aad cayintay in si joogto ah looga jari doono akoonkaaga bankiga si aad kharashka oga bixiso akoonkaaga *Good To Go!*

Waa inaad gujiso "waan aqbalay" kahor inta aan xaqiijinta elektarooniga buuxinta ee tooska ah aan la aqbalin ee akoonkaaga *Good To Go!*

Haddii tani tahay lacag bixin hal mar ah, oggolaanshahaan wuxuu shaqeyn doonaa kaliya lacag bixitaan. Haddii tani tahay lacag bixin soo noqnoqan doonta ee ootamaatiga ah, oggolaanshahaan wuxuu sii shaqeyn doonaa illaa inta aad wixii soo kordha u sheegeyso Xarunta adeegga macmiilka ee *Good To Go!* joojinta iyadoo baabi'inaysa wixii lacag bixin ah iyo shuruudaha lacag bixinta ee soo noqnoqda ee ka dhexjiray gudaha nidaamkaan ugu yaraan todoba (7) maalmood oo ah maalmaha shaqada kahor inta aan la qorsheynin in akoonkaaga laga jaro.

Shuruudaha iyo Xeerarka (ACH) Xaqiijinta Elektarooniga ah

1. Waa inaad doorataa jeega elektarooniga ah ee kaladuwan si aad qaab toos ah u bixiso \$30.00 ama ka badan (oo ah lacagta doolarka).
2. Si aad qayb oga noqoto lacag buuxinta elektarooniga ah, waxaad aqbalaysaa in lacagaha si ootamaatiga ah looga jarto akoonkaaga baanka oo ku saleysan cadadka lacagta aad cayinto. *Good To Go!* ma awoodi doono inuu ku ogeysiyo cadadka lacagta saxda ah kahor inta aadan la jaran. *Good To Go!* kulama socodsiiin doono in cadadka lacagta ay ka duwan tahay cadadka lacagtii ugu danbeysay ee lagu bixiyay habka lacag bixinta lacag elektarooniga ah ee akoonkaaga *Good To Go!* Cadadka Lacag bixinta ootamaatiga ah kama badan doono qiimaha doolarka ugu sarreeya ee kala duwanaanshaha lacag bixinta ee aad dooratay.
3. Macaamiisha doorta lacag bixinta elektarooniga ah ayagoo adeegsanaaya habka jeega elektarooniga ah waxaa laga doonaayaa in akoonkoodu mar walba ay kujirto lacag haraadi ah oo dhan cadadka kor lagu xusay. Lacag haraadiga ah ee la iska rabo waxaa lagu sameyn doonaa qiimeyn bil walba gaar ahaan maalmaha la doorto. Lacag bixinta tooska ah waxaa lagu hirgelin doonaa akoonada aan buuxin shuruudaha haraadiga (sida maalmaha la doortay) maalinta shaqada xigta kadib maalinta la doortay in lacagta akoonka laga jaro. Haddii taariikhda maalinta lacag buuxinta ay noqoto maalin fasax ah ama taariikho kale oo ah maalmo ay xiran yihiin hay'adaha maaliyadaha, lacag waxaa laga jari doonaa akoonka maalinta shaqada ee xigta.
4. Xogta lacag bixinta iyo lacaga la bixiyay waxaa mar walba laga heli karaa bartaan oonleenka ah ee www.MyGoodToGo.com.
5. Lacag celinada waxa la heli karaa marka la xiro akoonkaaga kadib marka aad bixiso dhammaan khidmadaha iyo lacaga aan wali la bixin waxaana lagu bixin doonaa akoonkaaga jeega elektarooniga ah. Haddii lacagta dib loo celinaayo aan lagu diri karin akoonkaaga, hab kale oo damaanad qaad (jeeg) ayaa lagu bixin doonaa.
6. Macaamiishu waxay joojin karaan buuxinta elektarooniga ah ahna ootamaatiga ayagoo la xariira xarunta adeegga macmiisha *Good To Go!* Joojintu waxay qaadan kartaa illaa todobo (7) maalmood oo ah maalmaha shaqada. Adeegga macmiilka waxaa laga xariiri karaa <https://mygoodtogo.com/EN/contact-us>.
7. Nuqul kala bax heshiiskan si aad ugu darto diiwaankaaga.

FADLAN DAABAC NUQULKA OGGOLAANSHAHAN SI AAD UGU DARSATO DIIWAANKAAGA